**Xeerka Sharciga 10 Juun 1965, lamba. 16.**

**Samaynta Hay'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.).**

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu arkay qod. 63 ee Dastuurka;

Markuu tixgeliyay, kadib dhicistii Degreeto-Sharci ee 30 Maarso, 1965, lamba. 9 ee ku saabsan samaynta Hay'adda Fooxa Qaranka (E.N.I.) waxaa lagama maarmaan oo degdeg ah in la soo saaro xeerar cusub oo la xiriiro arrintan;

Markuu arkay soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga;

Markuu Dhageestay Golaha Wasiirada;

## Wuxuu Xeeriyay

## Qod. 1

1.— Waxaa la aasaasay Hay'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.);

2.— Hay'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.) waa hay'ad lagu maamulo sharciga guud, waxayna leedahay shakhsiyad qaanuuneed iyo maamul madaxbannaan.

## Qod. 2

Hay'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.) waxay xafiis ku leedahay magaalada Bosaaso, waxayna ka samaysan kartaa laamo iyo wakaalado iyo xafiisyo ganacsi, gudaha dalka jamhuuriyada iyo dibadiisaba.

## Qod. 3

Hay'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.) waxay leedahay ujeeddada:

a) Horumarinta iyo abaabulka-horumarineed iyo ururinta Beeyada ee Jamhuuriyadda;

b) In la ilaaliyo wax-soo-saarka iyadoo la kordhinayo iibka gudaha, lana tayeeyo noocyada kala duwan ee wax-soo-saarka Soomaalida ee dibadda loo dhoofiyo, iyadoo ay ku xiran tahay xulashada, wax-soo-saarka Somaaliya iyo summad-ganacsiyeedka diiwaangashan;

c) in ay bixiyaan aqoon joogto ah oo ku saabsan xaaladda wax soo saarka fooxa dalka iyo dibadda, iyada oo loo marayo sahan tirakoob oo ka habboon kuwii hore.

## Qod. 4
## Hantida

Hantida Heyaddu waxay ka kooban tahay:

a) hanti guurto ah oo ay ku jiraan foox badan iyo hantida guurtada ah oo laga helay lacageenta E.N.A.M;

b) Hantida guurtada ah iyo tan ma guurtada ah oo ay suurtogal tahay in ay u xilsaartay Dawladda Jamhuuriyadda si loo gaaro ujeedooyinka hay'adaha;

c) Kaydka lacagaha lagu samaynayo qayb ka mid ah faa'iidada hawlgalka;

d) lacagaha kaloo tabarucaadka dheeriga ee Dawladda ama Hay'adaha Dawladda si loo krdhiyo sanduuqa hibeynta;

e) Deeqaha, dardaaranka, xornimada iyo dakhliga kale oo kasta ee guud ama gaar ah.

Si loo joogteeyo hantida gaarka ah, waxaa lagu hayn doonaa diwaanno hanti maguurto, guurto iyo mid maaliyadeed oo sugan.

**Qod. 5**
**Hab dhismeedka Heyadda**

Hey'addu waxay ka kooban tahay:

1) Guddoomiye;
2) Golaha Maamulka;
3) Agaasime;
4) Golaha Hantidhawrka

**Qod. 6**
**Qaabdhismeedka Golaha Maamulka**

Golaha Agaasimeyaashu waxaa ay ka kooban yahiin Guddomiye, saddex xubnood oo uu soo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, iyo saddex kaloo uu soo magacaabay Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha, isagoo la tashaday Guddoomiyeyaasha Gobollada ee awoodda u leh lixdaas xubnood ee aan kor ku soo xusnay.

Agaasimuhu waxaa uu uga qayb qaataa Xoghaye ahaan, isagoo aan xaq u lahayn in uu codeeyo dhammaan shirarka Golaha Maamulka.

**Qod.7**
**Magacaabidda Xubnaha Golaha Maamulka iyo Agaasimaha**

Guddoomiyeyaha iyo Agaasimaha ayaa lagu magacaabayaa wareegtooyin kala duwan oo ka soo baxa Madaxweynaha Jamhuuriyadda, iyadoo uu soo jeedinayo Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha oo la tashaday Wasiirka Maaliyadda ka dib markii uu la tashado Golaha Wasiirada.

Xubnaha kale ee lagu magacaabayo digreeto Ra'iisul Wasaaraha, ayaa waxaa soo jeedinayo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, kadib markii uu la tashado Golaha Wasiirada.

Muddada xafiisyada aan kor ku soo sheegnay waa saddex sano, marka laga reebok a noqosho aan la filaynin oo la soo qadimo ka noqoshada ama dib u cusboonaysiinta lagu go'aamiyay habka iyo qaabka lagu sheegay faqradda hore.

**Qod. 8**
**Awoodda Guddoomiyaha**

Guddoomiyahu:

a) Wuxuu metelaa ama yahay wakiilka sharci ee Hay'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.) wuxuuna fuliyaa hawlaha loogu igmaday sharciga iyo xeer hoosaadka;
b) Wuxuu shiriyaa uuna guddoomiyaa Golaha Maamulka;
c) Wuxuu go'aamiyaa arrimaha la horgeyn doono doodda Golaha Maamulka, wuxuuna kormeeraa fulinta go'aannadiisa;
d) Haddii ay jirto baahi degdeg ah, maqnaansho ama caqabad, Guddoomiyuhu wuxuu magacaabayaa beddelkiisa.

**Qod. 9**
**Awoodda Golaha Maamulka**

Golaha maamulka waxa uu isticmaalayaa dhammaan awoodaha maamulka caadiga ah si loo gaaro ujeedooyinka Hay'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.).
Gaar ahaan, Golaha Maamulku wuxuu go'aan ka gaaraa:

1) wixii ku saabsan soo jeedin wax ka beddel xeerarka gudaha dhaqan galka ah ee Hay'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.);
2) wixii ku saabsan shuruudaha lagu isticmaalaayo lacagaha hawl kastoo la maamulaayo;
3) Miisaaniyad sannadeedka;
4) Xeerarka Heyadda Beeyada Qaranka (E.N.I.) oo ay ku jiraan kuwa khuseeya shaqaalaha, xaaladda sharciga iyo daryeelka dhaqaalaha iyo faa'iidooyinka hawlgabka ee shaqaalaha;

5) kuwa ku saabsan soo jeedinta qiimaha laga siinayo dadka fooxa qaata;

6) Xulashada, tayada iyo keenista iyo xaraynta summad-ganacsiyeedka diiwaangashan ee badeecadaha Soomaaliya oo la xiriiro noocyada kala duwan ee wax-soo-saarka fooxa ee dibadda loo dhoofiyo, iyadoo ay u dheer tahay kororka iibka gudaha;

7) Oggolaanshaha go'aannada hawlaha maamulka aan caadiga ahayn iyo go'aannada hawlaha maamulka caadiga ah marka hawlahan dambe ay ku lug yeeshaan ballanqaadyo lacageed oo ka badan 50,000 (konton kun a) shilin Soomaali ah;

8) arrin kasta oo danta guud ah, iyo arrin kasta oo uu Guddoomiyahu u arko inay dan weyn ay ku jirto.

Marka la eego arrinta lagu sheegay lamba. 5, Golaha Maamulku, marka ay ka doodayaan soo jeedinta qiimaha fooxa laga siinaayo dadka, waa in ay sidoo kale xisaabta ku daraan natiijada dhaqaale ee maamulka.

Sicirka ayaa lagu go'aamiyaa digreeto uu soo saaray Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, kdib markuu la tashado Wasiirka Maaliyadda ka dib markii uu dhageystay Golaha Wasiirada.

Si fadhiyada Golaha Maamulka uu ansax u noqdo waxaa loo baahan yahay in ay joogaan aqlabiyadda xubnaha golaha.

Si loo ansaxiyo go'aannada, waxaa loo baahan yahay cod taageerayo aqlabiyadda kuwa joogo; haddii ay dhacdo in ay sinmaan codadka, dhinaca Guddoomiyaha ayaa mudnaan yeelanayo. Xoghayaha Golaha Maamulka iyo Agaasimaha am.

**Qod. 10**
**Awoodda Agaasimaha**

Agaasimaha:

a) Wuxuu qabanqaabiyaa fulinta go'aamada Golaha Agaasimayaasha iyo Guddoomiyaha asagoo saxiixayo qaraarrada hawlaha la xiriiro;

b) waa madaxa shaqaalaha, wuxuuna ilaaliyaa anshax marintooda, qabanqaabiya shaqada xafiisyada iyo goobaha shaqada, marka laga reebo xaaladaha uu Xeer-hoosaadka u ogolaanayo in uu bixiyo amarka Guddoomiyaha;

c) waa madaxa mas'uulka ka ah dhammaan adeegyada Hay'adda, bixinta amarka maamulkoda caadiga ah;

d) kartina u leh hawlaha maamulka caadiga ah ee ku lug leh ballan-qaadyo maaliyadeed oo aan ka badnayn Sh. So. 50,000 (konton kun);

e) waxaa uu diyaariyaa miisaaniyada iyo liiska Heyadda Fooxa Qaranka (E.N.I.) in loo gudbiyo Golaha Maamulka;

f) wuxuu xafidiyaa buugaagta iyo diiwaanka xisaabaadka;

g) wuxuu ku dhaqmaa sifo kasta oo kale oo uu sharcigu u baneeyo.

h) cid kasta oo ka wakiil ah.

**Qod. 11**
**Golaha Hantidhawrka**

Golaha Hanti-dhowrka ayaa ka kooban Guddoomiyaha, laba xubnood oo tayo leh iyo laba beddel ah, kuwaas oo ku magacaaban digreeto Ra'iisul Wasaaraha kadib soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga oo uu la heshiiyay ama la waafaqay Wasiirka Maaliyadda.

Xubnaha golaha hanti-dhawrku waxay xilka sii hayaan saddex sano haddii aanay ka noqoshada ama dib-u-cusboonaynta la filayo loo diyaarinin habka lagu sheegay faqradda hore.

**Qod. 12**
**Awoodaha Guddiga Hantidhawrka**

Guddiga Hantidhawrka waa maamulka gudaha ee Hay'adda. Wuxuuna ku fuliyaa shaqadiisa isagoo raacayo xeerarka u dejisan Hanti-dhawrka ee ku cad Xeerka Madaniga, sida lagu dabaqi karo.

Awoodaha kale ee uu leedahay guddiga waxaa ka mid ah:
a)u hoggaansamaan maamulka Hay'adda si loogu hoggaansamo shuruucda, wareegtooyinka, qaanuunka iyo xeerarka Hay'adda;
b) inuu hubiyo had iyo jeer ilaalinta joogtada ah ee buugaagta iyo diiwaannada xisaabaadka.

**Qod. 13**
**Mushaharka**

1. — Gunnooyinka, Mushaharka iyo cawil celin iyo gunnooyinka ka qaybgalka Guddoomiyaha iyo Agaasimeyaasha waxa lagu go'aamiyaa Digreetada Ra'iisul Wasaaraha ee uu soo jeediyay Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga iyadoo la raacayo Guddiga Kormeerka ee ku xusan qod. 18;
2. — Xubnaha Golaha Maamulka iyo Guddiga Hanti-dhawrku waxay xaq u leeyihiin gunno-sannadeed, iyo sidoo kale kharashka xaadirista shir kasta oo ay ka qaybgalaan.

Inta ay le'eg tahay gunnada iyo kharashka imaanshaha waxa lagu go'aamiyaa digreeto ka soo baxday Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha isaga oo la tashanaya Guddida Kormeerka sida waafaqsan qod. 18, kadib marka uu soo jeediyo Guddoomiyaha Heyadda Beeyada Qaranka ( E.N.I.).

**Qod. 14**
**Sannad Maaliyadeedka iyo Miisaaniyadda**

1. — Sannad xisaabeedka Hey'adda waxa uu bilaabmayaa bisha January wuxuuna dhamaanayaa 31 Decembar 1965 ee sanad walba.

Sannad-maaliyadeedka ugu horreeya wuxuu ka bilaabmayaa taariikhda la aasaasay hey'adda wuxuuna dhammaanayaa 31 Decembar, 1965.

2. — Sannad-maaliyadeed kasta, waxa la xisaabinayaa oo la ururiyaa faa'iidada, saafiga iyo khasaaraha, iyo sidoo kale liiska hantida iyo deymaha Hay'adda;
3. — Saddex bilood gudahood ee dhammaadka sannad-maaliyadeed kasta Agaasimuhu waxa uu diyaariyaa miisaaniyad-sannadeedka, xisaabaadka faa'iidada iyo khasaaraha iyo agabka Hay'adda; wuxuuna hordhigayaa Golaha Maamulka bisha xigta gudeheeda Goluhu wuxuu go'aamiyaa qoritaanka kama dambeysta ah ee warbixinnada maaliyadeed iyo agabka oo u gudbiyaa Guddiga Hantidhawrka, oo ay la socoto warbixin qoran;
4. — Guddiga hanti-dhawrka, 31-ka Maajo ee sannad kastaba, wuxuu u gudbiyaa Golaha.

Wasiirrada, si ay u ansixiyaan miisaaniyadda, iyada oo uu raacinayo warbixin qoraal ah oo ku saabsan wixii u fiirsasho ah;

5. — Ka hor inta aan la ansixin miisaaniyadda, xisaabaadka faa'iidada iyo khasaaraha iyo liiska aqabka, Golaha Wasiirada waxaa laga rabaa in ay dhagaystaan ra'yiga Hantidhowraha Guud;
6. — Miisaaniyadda iyo xisaabaadka faa'iidada iyo khasaaraha, ansixinta ka dib, waxa lagu daabacayaa faafinta rasmiga ah ayadoo laga qaadayo kharashka Heyadda Beeyada Qaranka (E.N.I.);
7. — Bil kasta, Hay'addu waxay u gudbisaa Guddiga Kormeerka iyadoo la raacayo qod. 18 ee xaalada guud xisaabaadka.

**Qod. 15**
**Faa'iidada Sanadka**

Faa'iidada saafiga ah oo la gaaray sida ku cad miisaaniyadda la ansixiyay ayaa loo qoondeeyaa qadar ilaa sodon boqolkiiba ah oo tartiib tartiib loogu sameynaayo sanduuqa kaydka,

iyo boqolkiiba afartan oo loogu sameynaayo sanduuqa kaydka aan caadiga ahayn iyo boqolkiiba soddon oo lagu shubi doono khasnadda dawladda.

**Qod. 16**
**Maamulka Guddoomiyaha**

1. — Dekereeto ka soo baxday Madaxweynaha Jamhuuriyadda, kadib marka uu soo jeediyo. Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, oo dhegeystay Golaha Wasiirrada, waxaa si ku meel gaar ah loogu wareejinayaa Maamulka Hay'adda, Guddoomiye aan caadi ahayn;
2. Isla habraacaas, haddii ay dhacdo baahi la caddeeyay, waxaa la diyaarin karaa in la kala diro oo la baabi'iyo lana lacageeyo Hay'adda iyadoo loo magacaabayo Guddoomiyaha oo lacageynaayo si loo fuliyo dhammaan go'aammada la xiriira.

Isla go'aankaas ayaa qeexayo qodobbada meesha laga sii aadayo oo ku tacluuqo ujeeddooyinka danta guud ee hawlaha ka dhasho dhamaadka lacageeynta,

**Qod. 17**
**Isqabsi La'aanta'**

Guddoomiyaha, Agaasimaha, Saraakiisha iyo dhammaan shaqaalaha kale ma qaban karaan hawlo kale oo xirfadeed, ganacsi, warshadeed iyo mid maaliyadeed oo ka duwan ama kula tartamaya hawlaha Hey'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.).

**Qod. 18**
**Kormeerka**

Kormeerka Hey'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.). waxaa fulinaya Guddi uu hoggaaminayo Ra'iisul Wasaaraha oo ka kooban Wasiirada Maaliyadda, Warshadaha iyo Ganacsiga iyo Beeraha iyo Farsamada Xoolaha.

**Qod. 19**

Xeerka Hey'adda Beeyada Qaranka (E.N.I.) iyo wax ka bedelkii u dambeeyay waxaa lagu ansixinayaa digreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda, iyadoo la raacayo soo jeedinta Wasiirka.

Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga ka dib marka la dhageysto Golaha Wasiirada.

**Qod. 20**

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo 30 Maarso 1965, waxaana la horgeyn doonaa Golaha Shacbiga si loogu beddelo sharci si waafaqsan iyo iyadoo la raacayo qod. 63aad ee Dastuurka.

Muqdisho, 30 Juun 1965.

**Aden Abdulla Osman**

Ra'iisul Wasaare K/ah
**Abdulcadir Mohamed Aden**
Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga
**Osman Mohamud Adde**